

DHILQE/DUKHAAN

Htel Xaqiiqada



Waa maxay dhilqe ama dukhaan?

Dhilqaha ama dukhaanka (oo magaciisa saynis yahay Cimex Lectularius) waa cayayaan ama casharad yar oo aan baalal lahayn oo leh midab ah casaan-cawlan, dhererkeeduna ka yar yahay ¼ inji. Badanaa waxay guriga la soo galaan saabaanka guriga ama boorsooyinka la isticmaalay. Waxay isku qariyaan meelaha cidhiidhiga ah, oo ay ku jiraan laalaabka furaashka, dildilaaca iyo godadka saabaanka, xagga dambe ee sawirada darbiga sudhan ama wargeysyada ama joornaalada filiqsan, hoosta qadiifadaha iyo xagga dambe ee looxaanta dhulka. Habeenkii ayay soo baxaan si ay quud u raadsadaan waxana ay qaniinaan meelana qaawan ee jidhka dadka sida qoorta, cududaha, garbaha iyo gacmaha. KUMA noolaadaan oogada jidhka sida injirta ama injir-boodada/takfiga. Waxay

soo gali karaan guriga qof kasta SABABTUNA MA AHA INAAD NADAAFAD XUN TAHAY. Waxay dhawr bilood ku noolaan karaan guri cidlo ah, waxana ay u soo xamaaran karaan qolalka ama abaarmanada cusub, waxay u safri karaan guryaha cusub iyaga oo saaran saabaanka iyo dharka ay soo qaataan dadka guuraya. Dhilqaha ama dukhaanku waxyeelo ma u geysan karaan caafimaadkayga?

Ma jiraan cuduro la og yahay oo dhilquhu ama dukhaanku u geysto bini'aadanka. Hase yeeshee, qaniinyadu waxay sababi kartaa cuncun, barar, danqasho waxana laga yaabaa inay qas galiso hurdada. Si loo yareeyo halista caabuq, ha xoqin meesha ay qaniineen laakiin ku dhaq meesha saabuun lid ku ah bakteeriyada.

Maxay kireysteyaashu sameyn karaan?

- ◆ Dhibaatada u sheeg mulkiilaha guriga. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa Adeegyada Kormeerka ee Boston (Boston Inspectional Services) ama Guddida Caafimaadka Dadweynaha Boston (Boston Public Health Commission).
- ◆ Waa in mulkiilaha gurigu soo kireysto dulin-dile leh liisan/shati si dhibaatada wax looga qabto waana inuu ku siiyo ogeysiis iyo fariimo qoran oo ku saabsan sida diyaar loo noqdo. Waa inaad raacdid fariimaha.
- ◆ Dharka, go'yaasha iyo busteyaasha ku dhaq biyo kulul oo ku qalaji kulayl sare si ay u dhintaan ukunta dhilqaha/dukhaanka. Dharka nadiifta ah ku rid baco cusub waana inay xidhnaadaan ilaa inta uu dulin-diluhu abaarmanka ka shaqeynayo.

Ka Hortag Dhilqaha/Dukhaanka!

Waxa jira dhawr wax oo aad sameyn kartid si aad u yareysid suurogalka in dhilqe/dukhaan ku soo galo:

- ◆ Marna ha soo qaadan saabaanka ama alaabta guriga iyo boorsooyinka lagaga tago jidka dhinaciisa si qashin ahaan loo qaado iskana ilaali inaad soo iibsatid saabaanka ama boorsooyinka la isticmaalay.
- ◆ Weydiiso in guriga aad kireysanaysid kormeer ay ku sameeyaan Waaxda Adeegyada Kormeerka ee Boston (Boston Inspectional Services Department) oo leh teleefonka ah 617-635-5322.
- ◆ Gufee wixii ah dildilaacyo ama godad ku yaala darbiyada, saqafka hoose ee guriga, iyo saxxadda gudaha ee guriga.

Maxay mulkiileyaashu sameyn karaa?

- ◆ Si taxadir leh u dooro dulin-dile liisan leh oo leh qorshe gaar ah iyo waayo-aragnimo xagga ka-takhalusidda dhilqaha/dukhaanka. Dulin-diluhu waxa uu hirgalin doonaa Qorshe Mideysan oo ah Maamulista Dulinka (Integrated Pest Management) (IPM), kaasoo sharaxaya baaxadda jiritaanka dulinka iyo talaabooyinka la qaadayo si loo xakameeyo oo loola socdo. Waa in qorshaha IPM lala wadaago deganeyaasha.
- ◆ Waa inaad u sheegtid deganeyaashaada taariikhda iyo wakhtiga waxqabadka la qorsheeyay iyo sida wax loo qabanayo. Waa inaad siisid fariimo qoran ugu yaraan 48 saacadood ka hor hawlgalka.
- ◆ U hubso in dhamaan deganeyaashaadu raacaan fariimaha diyaargarowga iyo in dulin-diluhu fiiriyo dhamaan abaarmanada ama guryaha iyo in uu ka hawlgalo abaarmanada ama guryaha dulinka laga helay iyo kuwa ku wareegsan (ka sareeya, ka hooseeya, ka xiga dhinac kasta, iyo ka soo horjeeda).



Si aad u heshid war dheeraad ah, fadlan wac:
Guddida Caafimaadka Dadweynaha Boston
(Boston Public Health Commission) oo leh 617-534-5966
Adeegyada Kormeerka ee Boston
(Boston Inspectional Services) oo leh 617-635-5300



Boston Public Health Commission
1010 Massachusetts Avenue
Boston, MA 02118
www.bphc.org
Dr. Barbara Ferrer, Maamule Fuliye
Thomas M. Menino, Duqa Magaalada